



Waxaa bilaabmay sanad-dugsiyeed cusub: Fariin ka socota Guddoomiyaha Waxbarashada Guerrero

Gacaliye Waalidiin iyo Shaqaalaha PPS,

Waxa inoo bilaabmaya bilow aad u wacan! iyada oo todobaadkani aan booqanay iskuulada, waxaa wajiyada ardayda iyo macalimiintoodaba ka muuqday qosol farxadi ku dheehan tahay. Arbacadii la soo dhaafay shaqaalaha ka shaqo gala xarunta dhexe oo ka badnaa 125 shaqaale ah ayaa maalintaasi booqasho waxa ay ku tageen meel kasta oo gargaar looga baahnaa oo ka mid ah dhammaan dugsiyada degmada. Waxa aan aad ugu farxay sida niyadsamida iyo kalgacalku ku jiro ee macalimiinteena iyo shaqaalaha kale ay ardeydeena ugu soo dhaweynayaan iskuulada maalintii Arbacada ahayd.

Bilowga sanad-dugsiyeed kasta waxa la socota farax iyo rajo. Fasaxii xaggagani wuxuu ahaa mid lagu mashquulsanaa hawlo fara badan. Waxaa iskuulo fara badan oo ka mid ah iskuuladeena loo magacaabay hoggaamiyaal cusub, waxaa la dhammeystiray shaqadii dib u cusbooneysiinta iyo dhismaha dhismayaal fara badan oo iskuuladeena ah, iyo iyada oo shaqaalaha xarunta dhexe ee hibada leh la siiyey fursado ay ku baranayeen xirfado. Waxaan jecelahay inaan u mahadceliyo guud ahaan bulshooyinka iskuuladeena sidii ay uga qeybqaateen sidii ay u xaqiijin lahayeen in iskuuladeenu noqdaan kuwa diyaar u ah ardeydeena, waxa sidoo kale iyaguna ka mid ah dadkii mutadawiciinta ahaa waqtigooda u soo horey maalinta loogu magac daray Maalinta Daryeelka Bulshada sidii ay u qurux lahaayeen todobaadkii la soo dhaafay dhismayaasha iskuuladeena. Dareenkani sidoo kale waxaa ka mid ahaa macaliinta oo si taxadir leh u diyaariyey fasaladooda, maamulayaasha iyaguna sameeyey qorsheyn fara badan iyo diyaar garow, shaqaalaha kale ee iskuulka oo iyaguna ka qeybqaatay tababaro dheeraad ah waqtigii fasaxa xaggaaga, iyo wadayaasheena basaska ee hawlarka ah, shaqaalaha daryeela nadaafada iskuuladeena, iyo shaqaalaha cuntada. Waxaa jira dhowr tusaale oo yar yar, waxaan u mahadnaqayaan qof kasta oo waqtigiisa galiyey sidii uu u daryeeli lahaa ardaydeena.

Dadaalkani taban ee wada jirka ahi ayaa ka tarjumaya in aan dhammaanteen isbedel fiican ku sameyneyno Dugsiyada Dadweynaha Portland. Waxaan aaminsanahay in sanadkani noqon doono sanad aad u wanaagsan. Ardayda, macalimiinta, iyo in badan oo ka mid ah bulshada daneeyaasha ah waxa ay waqti galiyeen sanadkii la soo dhaafay horumarinta himilada mustaqbalka ee [dib u fiirinta Dugsiyada Dadweynaha Portland](#). Hawshaasi waa mid iminka gacanta lagu hayo. Sida ay himiladeenu sharxayso, waxa ay tahay ballanqaad aynu kula wadaageyno arday kasta waayo-aragnimadiisa fiican iyo sinnaanta marka ay ka qalin-jabiyaan iskuulka inay yihiin kuwa u diyaarsan sidii ay u hoggaamin lahayeen iyaga oo dunidana isbedel ku sameynaya.

Tani waa hami iyo hawl xiiso leh oo ina hor taala. Waxaa sharaf ii ah in aan geedigani aniguna aan qeyb ka ahaa.

Waxaan idiin rajeynayaa todobaad dhammaadkiisa oo farxad leh iyada oo aan ku faraxsanahay in soo dhaweyno dhamman ardaydeena cusub ee Xannaanada maalinta Tallaadada!

Guadalupe Guerrero
Guddoomiyaha Waxbarashada